Ministry of Justice and Security

Waxaa laguu xiray arrin la xiriirta waarankii xarigga ahaa ee midowga Yurub waxaana laguu qaaday saldhigga, saldhigga booliska ama goob kale si su'aalo laguu weydiiyo

Somalisch

Waddan Xubin ka ah Midowga Yurub(EU) ayaa kuusoo jaray waaran laguugu soo xirayo. Sababtaan darted, boolisku, Royal Netherlands Marechaussee (KMar) ama hay'ad kale oo danbi baaris oo ay Holland leedahay ayaa kusoo xirtay. Waa muhiim in aad si buuxda u fahamto xaquuqda aad leedahay, sidaa darted fadlan waraaqdaan si taxaddar leh u akhri.

Habka dacwadda loo qaadayo

Waa lagu soo xiray waxaana laguu qaaday saldhigga booliska. Dacwad oogaha ama kusimaha dacwad oogaha ayaa hadda go'aan ka gaari doona in loo baahan yahay in aad saldhigga kusii xirnaato iyo in kale. Joogitaankaaga saldhiguu wuxuu ugu badnaan noqon karaa 3 maalmood. Si kastaba ha ahaatee, xaaladaha qaarkood, dacwada ooguhu wuxuu go'aansan karaa in uu saldhigga booliska kugu sii hayo 3 maalmood oo dheeraad ah.

3 maalmood gudahood, laakiin lacala haddii ay dhacdo 6 maalmood gudahood, waxaa lagu horgayn doonaa dacwad oogaha ama xaakimka ku shaqada leh ee Amsterdam. Dacwad oogaha ama xaakimka ku shaqada leh wuxuu go'aan ka gaari doonaa in aad sii xirnaanayso iyo in kake. Haddii aad sii xirnaanayso, waxa laguu qaadi doonaa xarun xabsi ah.

Dhegaysi dacwad madani ah ayaa lagaaga muddayn doonaa Maxkamadda Degmada Amsterdam 60 maalmood gudahood, laakiin kama badnaan karto 90 maalmood. Ujeeddada dhegaysigaanu waa in lagu qiimeeyo codsiga soo gacan galinta ah ee uu soo saaray Waddanka Xubinta ka aha Midowga Yurub. Waxaad khiyaar u haysataa in aad ka soo qayb gasho, ayada oo uu qareenkaagu kula socdo, laakiin waxaad sidoo kale go'aansan kartaa in aadan kasoo qaybgalin dhegysigaan. Marka ay sidaan tahay, qareenkaaga ayaa ku matali doona kuuna hadli doona. Wax kasta oo aad go'aansataba, waxaad markasta **xaq u yeelan doontaa in ay ku dhegaysato** Maxkamadda Degmada Amsterdam.

Maxkamadda Degmada Amsterdam ayaa go'aan ka gaari doonta aqbalaadda in laguugu gacan galiyo 2 todobaad gudahood. Haddii maxkamaddu go'aasato in ay aqbasho codsiga, waxaa laguu gacan galin doonaa waddanka Xubinta ka ah Midowga Yurub ee soo saaray soo gacan galintaada 10 maalmood gudahood.

Hannaanka lasoo gaabiyay

Waxaad xaq u leedahay in aad aqbasho codsiga soo gacan galinta ah ee uu soo saaray Waddanka Xubinta ka ah Midowga Yurub. Xaaladdaanu marka ay dhacdo, ma jiri doonto in dacwad madani ah lagaaga qaado Maxkamadda Degmada Amsterdam. Hannaanku wuxuu noqon doonaa mid dhakhso ah haddii aad aqbasho in lagu gacan galiyo. Si aad sidaa u samayso, waxaad u baahan doontaa in aad hor timaaddo maxkamadda muddo gaaban aadna caddayso in aad aqbashay in lagu gacan galiyo. Qareenkaagu waa uu kasoo qaybgali karaa arrintaan. Arrintaan waxaa loo yaqaannaa hannaanka lasoo gaabiyay. Haddii maxkamaddu aqbasho gacan galintaada, waxaa laguugu wareejin donaa Waddanka Xubinta ka ah Midowga Yurub ee soo saaray waaranka xariggaaga 10 maalmood gudahood.

Haddii aad aqbasho in lagu gacan galiyo, waxaa ka dhalan doona natiijooyinka soo socda: Marka aad ka caddayso maxkamadda horteeda in aad aqbashay in lagu gacan galiyo, kama laaban kartid go'aankaas

Waddanka Xubinta ka ah midowga Yurub ee soo saaray soo gacan galintaadu wuxuu kugu eedayn karaa danbi aan kujirin liiska waaranka xarigga ah ee Yurub, in aad racfaan ka qaadato arrintaas maahane. Waa muhiim in aad xaaladaha si faahfaahsan ugala xaajooto qareenkaaga kahor inta aadan aqbalin in lagu gacan galiyo.

Waa maxay xaquuqahaagu?

- Waajib kuguma ahan in aad su'aalaha ka jawaabto (waxaad xaq u leedahay in aad aamusnaato)
- Waxaad xaq u leedahay in uu garyaqaanku ku siiyo kaalmo dhanka sharciga ah
- Waxaad xaq u leedahay in tarjumaan u uku caawiyo
- Waxaad xaq u ledahay daryeel caafimaad

Xaq u yeelashada in aad aamusto
Waajib kuguma ahan in aad wax warbixin ah bixiso inta dacwaddaanu socoto. Waajib kuguma ahan in aadka jawaabto su'aalaha sarkaakiisha, dacwad oogaha, kusimaha dacwad oogaha amase maxkamadda.

Xaq u yeelashada matalaad dhanka sharciga ah
Waxaad xaq u leedahay in qareenkaagu kaalmo dhanka sharciga ah ku siiyo. Boolisku waxay kugu soo xiri doonaan qareen sida ugu dhakhsaha badan marka lagu soo xiro. Haddii aad taqaano qareen aad doonayso in aad la hadasho, waad codsan kartaa qareenkaas. Haddii aad jeclaan lahayd in aad la kulanto qareen gaar ah, fadlan sida ugu dhakhsaha badan booliska ugu sheeg. Waxaa dhici karta in ay muddo xoogaa ah qaadato kahor inta uusan qareenkaagu imaan saldhigga booliska. Qareenkaaga waxaa laga rabaa in uu ku yimaado laba saacadood gudahood, laakiin markasta suurtagal maahan arrintaanu.

Waxaad markasta awood u yeelan doontaa in aad qareenkaaga ula hadasho qaab kalsooni leh. Qareenkaaga waxaa kaliya oo loo oggolaan doonaa in uu kiiskaaga cid kale kala hadlo haddii aad adigu ogolaato. Waxaa laguu oggolaan doonaa in aad qareenkaaga la tashato ugu badnaan 30 daqiiqo kahor inta uusan dacwad ooguhu ama kusimaha dacwad ooguhu go'aan ka gaarin in loo baahan yahay in saldhigga booliska laguugu sii hayo iyo in kale. Qareenkaaga waxaa loo ogolyahay in uu goobjoog ahaado inta uu socdo wareysiga garyaqaanka ama kusimaha garyaqaanku.

Uma baahnid in aad adigu iska bixiso lacagta qareenka. Haddii aad adigu doorato garyaqaabkaaga kuu gaarka ah, waxaa jira xaalado gaar ah oo loo baahanyahay in aad kharashaadkaan iska bixiso adigu. Xogtaada shakhsiga ah waxaa la siin doonaa Guddiga Kaalmada Sharciga (Raad voor de Rechtsbijstand) waxaana lagu diyaarin doonaa maamulkooda dhexdiisa.

Waxaad sidoo kale dacwad oogaha ka codsan kartaa in uu kuu diyaariyo qareen kaaga dooda Waddanka Xubinta ka ah Midowga Yurub ee soo saaray waaranka xariggaaga. Qareenku wuxuu qareenkaaga ree Holland la socodsiin doonaa dacwadda ka dhacaysa Waddanka Xubinta ka ah Midowga Yurub ee soo saaray waaranka xariggaaga.

Maamulka Waddanka Xubinta ka ah midowga Yurub ee soo saaray waaranka xariggaaga ee Yurub waxaa laga yaabaa in ay kuu sheegaan in aad haysato khiyaar aad kaalmo uga heli karto qareen waddankaas ah. Arrintaani waa wax adiga lagaa rabo in aad diyaarsato, hase ahaatee qareenkaaga ree Holland ayaa kaa caawin kara.

Muxuu qareenkaagu samayn doonaa?

Qareenkaagu wuxuu kugu matali doonaa danahaaga wuuna ku caawin doonaa inta lagu jiro hannaanka gacan galinta – Inta lagu jiro wareysiga booliska, marka lagu horkeeno dacwad oogaha ama xaakimka ku shaqada leh iyo dacwadda madaniga ah ee ka dhacaysa Maxkamadda Degmada Amsterdam.

Qareenkaagu:

- wuxuu kuu sharixi doonaa talaabooyinka dacwadda ku taxaluqa
- wuxuu kuu sharixi doonaa waxa ay yihiin xaquuqaha iyo waajibaadka aad leedahay
- wuxuu kuiin doonaa talo ku saabsan hannaanka lasoo gaabshay
- wuxuu kusiin doonaa talo dhanka sharciga ah
- wuxuu qoyskaaga, saaxiibadaa ama loo shaqeeyahaaga ku wargalin doonaa xaaladdaada, haddii aad rabto
- wuxuu la xiriiri doonaa qareenkaaga ku sugan waddanka soo codsaday gacan galintaada.

Xaq u yeelashada tarjumaan
Haddii aaan fahmayn ama aadan ku hadlin luuqadda Holland, ama aadan si wanaagsan ugu hadlin aadanna u fahmin, waxaad xaq u leedahay in tarjumaan u uku caawiyo. Xaq u yeelashadaan tarjumaanku waxay sidoo kale khusaysaa haddii ada wax yar kaga hadasho aadna/ama aad ka fahamto. U sheeg booliska in aad dhibaato ku qabto fahamkooda, si tarjumaan laguugu yeero. Tarjumaankaagu wuxuu sidoo kale ku caawin doonaa marka aad qareenkaaga la hadlayso. Qareenkaaga looma ogolaan doono in uu xaaladdaada ka hadlo asaga oo aan fasax kaa haysan. Uma baahnid in aad lacagta tarjumaanka iska bixiso.

Xaq u yeelashada daryeelka caafimaadka
Waxaad xaq u leedahay daryeel caafimaad Fadlan u sheeg booliska haddii aad xanuun dareemayso, aad jeclaan lahayd in aad dhakhtar la hadasho ama aad u baahan tahay daryeel caafimaad. Sidoo kale ku wargali booliska haddii aad daawo isticmaasho aadna u baahan tahay.

Xaquuqaha kale
Waxaad xaq u leedahay in aad hesho nuqul kamid ah waaranka xarigga ah ee Yurub. Haddii waaranka xarigga ah ee Yurub u uku qoran yahay luuqad aadan garanayn, waxaad xaq u leedahay in laguu tarjumo qaybta muhiimka ah ee waaranka.

Haddii adaan haysan muwaadimnnimada Holland, waxaad sarkaalka danbi barista ka codsan kartaa in uu ogaysiiyo qunsuliyadda ama safaaradda waddankaaga in aad kujirto xabsiga booliska.

Wax su'aalo ah ma qabtaa?
Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan weydii qareenkaaga ree holland amase sarkaalka danbi barista.

Tafaasiisha daabacaadda
Waraaqdaan macluumaadka waxaa daabacay
Wasaaradda Cadaaladda iyo Ammaanka.
PO Box 20301 | 2500 EH The Hague

Diisambar 2022 | 22408855

Wax xaq ah looma lahan in wax macluumaad ah lagala baxo waraaqdaan macluumaadka.